



DUQDA MAGAALADA JANAY WAXAY KU DHAWAAQDAY IN DIB LOO BILAABI DOONO NADAAFADDA JIDADKA; WAXAA DHICI DOONO BROGRAAMKA CAFFINTA TIGIDHKA; WARARKII UGU DAMEYAY HIRGELINTA MEELAHA LA DHIGTO BAABUURTA

BOSTON - Talaado, Abril 13, 2021 - Duqda Magaalada waxay maanta ku dhawaaqday in Waaxda Gaadiidka Boston (Boston Transportation Department) (BTD) casriyeysay sharciyaga hirgelinta dhigashada baabuurga Magaalada Boston. Laga bilaabo Talaado, Abril 20, hirgelinta meelaha baabuurga la dhigto wuxuu ku soo noqon doonaa magaalada oo idil, kana mid ah jiidashada baabuurga waqtiga xaaqidda jidadka iyo tigidhada la siiyo meelaha baabuurga la dhigto aan lahayn stikarka ku habboon ee la siiyo qofka xaafadda daggan. Sidoo kale, ilaa laga gaaro Maajo 31, BTD tigidh ma siin doonto dadka daggan xaafadda uu ka dhacay stikarka fattashaadda.

Waxaa dheeraad ah in bishii Abril 20, waxaa dhici doono ka-dhaafidda tigidhka Waaxda Gaadiidka Boston (Boston Transportation Department) ee loo samayay shaqaalaha daryeelka caafimaadka. Bilowga dillaaca cudurka COVID-19, BTD waxay ku dhawaaqday in shaqaalaha daryeelka caafimaadka la kulmi karaan in laga dhaafio jebinta [ammaanka aan dadweynaha quseynin](#) ee laga qaato racfaan haddii tigidhka la siiyo inta lagu sugar yahay shaqada. Ujeedada brograamka waxay ahayd in la kaalmeeyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka inta ay ku hawlan yahiin degdegga caafimaadka dadweynaha.

Magaalada Boston iyo iskaashataadeeda dawladdaha hoose ee Brookline, Cambridge, Everett, iyo Somerville waxay sii wadi doonaan in ay dhamaan shaqaalaha loo baahan yahay ee ku sugar magaalada hoose Boston siiyaan shatti 90-maalin oo lacag la'aan ah oo loogu talogalay siistemka mootada dadweynaha ee la qeybsado. Waxaad macluumaad badan ka heli kartaa [boston.gov/bike-share](#).

"Marka aan ku sii socono in aan qorsheysano ka soo kabsashadena dillaaca cudurka COVID-19, aniga waxaan u mahad celinaa iskaashiga ay muujiyeen dhamaan dadkeena daggan sida ay u raaceen hirgelintena meesha baabuurga la dhigto," ayay tiri Duqda Magaalada Janey. "Marka cimilada soo kululaato, waxaa muhiim ah in aan qaadno talaabada loo baahan yahay si aan u ilaalino nadaafadda jidakena.

"Waxaan ka mahad celineynaa in Magaalada Boston awood u yeelatay in ay taageero dheeraad ah siiso dadka daggan iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka waqtigaan aan horay loola kulmin" ayuu yiri Guddoomiyaha Greg Rooney "Dadka daggan waa in loo

B

sheego in aan bilownay in aan ku soo noqono hawlahena caadiga iyo waa in ay raacaan dhamaan sharciyada u dagsan meelaha baabuurta la dhigto ee la soo geliyay.

Magaalada Boston waxaa laga hirgeliyay sharciyada la xariira meelaha baabuurta la dhigto ee soo socdo:

MITIRADA MEELAHA UU DAGANAHA DHIGTO BAABUURKA

Dadka daggan Boston ee haysta ruqsadaha dhigashada dagganaha waxay ku sii socon doonaan in la ogolaado in baabuurta la dhigto mitirada ku yaal xaafadooda iyadoo aan loo hoggaansamin waqtiyada loo qabto ama bixinta mitirka.

BOSTARADA ITAAL DARRIDA

Laga bilaabo Maajo 31, BTD waxay dib u bilaabi doontaa in tigidh la siiyo boostarada/sumadaha itaal darrida ee dhacay. [Diiwaan Gelinta baabuurta waxay ka shaqeysaa oo keliya codsiyada boostarada itaal darrida/boorarka ee lagu soo diro boostada.](#)

Si loo arko liis dhamaystiran oo ku saabsan koodadka meelaha la dhigto baabuurta iyo ganaaxa la siiyo dadka daggan Magaalada Boston, dagganeyaasha waxay booqan karaan [halkaan](#) ama waxay wici karaan 311.

Waaxda Gaadiidka Boston (Boston Transportation Department) waxay sii wadi doontaa in ay qiimeyso isbaddalada dheeraadka ee lagu samayay hirgelinta meelaha la dhigto baabuurta inta ay socoto dib u furidda qeybaha. Si aad u heshid maclumaad badan, fadlan booqo [boston.gov/transportation](#).

KU SAABSAN WAAXDA GAADIIDKA BOSTON (BOSTON TRANSPORTATION DEPARTMENT)

Ujeedadena waxay tahay in la qorsheeyo, la dhiso, la dayactiro, looga shaqeeyo jidadkena hab kordhiso helitaanka fursadaha, horumariyo ammaanka iyo adkeysiga, iyo horumariso tayada ugu sareyso nolosha qof kasta oo ku nool, ka shaqeeyo, iyo soo booqda Magaaladena.

###